

## Aruurinta Qaan-celinta ay Maxkamad Amartay

### Lacag Dib-u-celinta

Xadgudbe la saaray ganaax magdhaw (lacag dib-u-celin) ayaa lacagta u diraaya maamulka maxkamada maxaliga ah, kuwaasoo maareeya lacagta una dira jeega dhibanaha xadgudubka. Xadgudbuhu lacagta toos uguma diraayo dhibanaha. Dhibanayaashu waa inay wacaan maamulka maxkamada si ay u xaqiijiyaan cinwaankooda ayna u keenaan isbadallada cinwaanka maadaama lacagaha la bixinaayo ay qaadan karaan muddo dheer.

### Qorshayaasha Lacag Bixinta

Si guud, lacag celinta ayaa la baxshaa marka la amro, hase yeeshee, xadgudbayaasha ayaa fursad u helaaya inay helaan qorshe lacag bixin, oo ay ka helayaan sarkaalkooda dabagalka ama maamulka maxkamada. Dhibanayaasha ayaa la xariiri kara sarkaalka dabagalka eedaysanaha ama maamulka maxkamada si uu u helo jadwalka lacag bixinta iyo cadadka la bixinaayo. Qorsheyaasha lacag bixinta ayaa badanaa lagu tixgeliyaa awooda lacag bixinta ee eedaysanaha. Qaybaha lacagaha la bixinaayo markiiba ayaa yaraan kara, waxayna qaadan kartaa sanado in eedaysanuhu uu dhiibo lacagta bagdhawga ah oo buuxda.

### Eedaysanayaasha lagu hayo dabagalka

Saraakiisha dabagalka ayaa kormeeraaya eedaysanayaasha dabagalka lagu hayo lana soconaaya ku dhaqankooda shuruudaha dabagalka, iyo bixinta lacag magdhawga ah. Hase yeeshee, haddii eedaysane aan la kormeerin, ma jiro qof masuul ka ah kormeerka eedaysanaha oo xaqiijinaaya ku dhaqanka shuruudihiisa dabagalka. Noocan dabagalka ah ayaa loogu yeeri karaa mid maamul ama dabagalka maxkamada.

### Eedaysanayaasha lagu xukumo xabsi

Eedaysanayaasha lagu xukumo in la dhigo xarunta Waaxda Dhaqan Celinta ee Minnesota (DOC) (xabsi) ma lahan qorsheyaasha bixinta lacagta magdhawga ah. Hase yeeshee, DOC ayaa leh farsamooyin sahlaaya in lacag celinta laga qaado eedaysanayaasha ayagoo ku jira xabsiga. Lacagta laga qaado ayaa loo dirayaa maamulka maxkamada ee degmada eedaysanaha lagu xukumay, taasoo maamulaysa una diraysa jeega lacagta qofka dhibanaha ah.

Dhibanayaasha ku jira xabsiga ayaa la xariiri kara midkood maamulka maxkamada degmada eedaysanaha lagu xukumay ama Barnaamijka Adeegyada Dhibanaha iyo Soo Celinta Cadaalada ee DOC (800-657-3830) si loo xaqiijiyo in amarka lacag bixinta ee kiiskooda loo diro DOC. Marka eedaysanayaasha laga fasaxo xabsiga, waxaa caadiyan la gashaa siidaynta la kormeero. Sarkaalka kormeeraaya ayaa la soconaaya eedaysanayaasha si loo hubiyo ku dhaqankooda shuruudaha siidayntooda, ayna ku jiraan bixinta lacagta magdhawga ah.

### Eedaysanaha dhamaystay dabagalka ama kormeerka

Eedaysanayaasha mudadooda dabagalka ama siidaynta la kormeeraayo ay dhamaatay ayaa ka baxaaya xukunka amarka maxkamada. Inkastoo amarka lacag bixinta wali jiro, ma jiro qof masuul ka ah la socoshada ama ku dhiiri gelinta eedaysanaha inuu baxsho lacag celinta mana jirto cawaaqib uu waajahaayo eedaysanuhu oo ku aadan fal danbiyeed la xariira inuu bixin waayay lacagta. Hal dookh oo heerkood lagu helaayo waa in dhibanuhu uu helo amarka lacag bixinta oo loo gudbiyo dacwad madani ahaan

### Haddii Eedaysanuhu Bixin waayo lacagta

Xaqiiqada ah in lacag bixinta ay amartay maxkamad ma damaanad qaadayso in eedaysanuhu lacagta baxsho.

Haddii aan eedaysanuhu bixin lacagta sida ku cad qorshaha lacag bixinta iyo amarka dabagalka, dhibanaha ayaa xaq u leh inuu codsado dhagaysiga dib u eegista dabagalka asagoo la xariiraaya dacwad oogaha ama sarkaalka dabagalka. Hase yeeshee, ku

## COLLECTING COURT-ORDERED RESTITUTION – SOMALI

fashilmida bixinta lacagta ayaan markasta keenayn jabinta amarka dabagalka. Dacwadaha qaarkood, maxkamada ayaan qabanayn dhagaysiga jabinta dabagalka haddii jabintu keliya tahay bixinta lacagta magdhawga ah.

Haddii lacagta magdawga ah aan lagu bixin 60 maalmood gudahood kahor intaysan dhicin mudada dabagalku, sarkaalka dabagalka waa qasab inuu codsado dhagaysi. Xiliga dhagaysiga, xaakim ayaa kordhin kara dabagalka eedaysanaha si loo siiyo waqti dheeraad ah oo uu lacagta ku baxsho.

### Dookhyada kale ee dib-u-bixinta lacagta

Inkastoo nidaamka cadaalada danbiyadu uu iskudayo inuu lacagta magdhawga ka qaado eedaysanaha, dookhyada kale ee soo magista lacagta magdhawga ah ayaa la qaadi karaa sidoo kale.

#### Xukun Madani ah

Dhibanayaasha ayaa iskudayi kara inay lacag celinta ku helaan maxkamad madani ah ayadoo la adeegsanaayo xukun madani ah. Si loo helo amarka magdhawga "liiska la galiyay." ama loo galaayo xukun madani ahaan, dhibanuhu waa inuu keenaa cadaynta Aqoonsiga Daynta Xukunkii hore oo uu soo raacinaayo nuqulka amarka lacag bixinta ee ay baxsheen maamulka maxkamada degmada eedaysanaha lagu xukumay. Xukunka madaniga ah wuxuu abuurayaa xanibaad (ama hakin) ka dhan ah eedaysanaha (qofka qaanta lagu leeyahay) kaasoo ka muuqanaaya jeegaga daynta iyo baarista sabar loogooyinka guryaha ilaa uu ka dhiibo lacag celinta. Xukunka ayaa la fulin karaa muddo 10 sano ah waana la cusboonaysiin karaa. Amarka dib u soo celinta ee loo diiwaan galiyay sida xukun madani ah ma dhacayo ilaa lagu qanco ama si kale laga saaro iyadoo la raacayo amar maxkamadeed.

Ma jirto lacag ku baxaysa gudbinta amarka lacag celinta oo dib loogu sharciyeeyo dhibanaha. Dhibanayaashu waxay codsan karaa in xukun madani ah lagusoo gudbiyo dukumiinti qarsoodi ah kaasoo cadaynaaya inaan xogtooda la tusi karindadwaynaha, oo uu ku jiro eedaysanuhu.

Dhibanayaasha ayaa adeegsan kara farsamooyinka lagu heli karo maxkamada madaniga ah si ay ugu helaan xukunkaan, tusaale, ka jarista lacagta mushaaraadka ama koontooyinka baanka. Dhibanayaasha aan aqoon meesha eedaysanuhu ka shaqeeyo ama uu lacagta dhigto ayaa la xariiri kara maamulka maxkamada si ay u gudbiyaan Codsiga Amarka Shaacinta si uu u helo xogta dhaqaalaha ee eedaysanaha. Amarka fulinta, oo sidoo kale lagasoo qaato maamulka maxkamada, ayaa loo adeegsadaa si loola wareego hantida lagusoo magaayo daynta. Taliyaha nabadgalyada deegaanka ayaa fulinaaya Amarka Fulinta. Hantida qaar ayaa lagula wareegi karaa qaabkaan, laakiin dhibanayaasha doonaaya inay adeegsadaan qaabkaan ayaa u baahan xog gaar ah oo ku saabsan hantida, alaabo badan ayaana ku jirin waxyaabaha lala wareegaayo. Waxaa intaas dheer, qarashka gudbinta dacwada iyo qarashaadka kale ayaa la xariira xeeladaan aruurinta. Cawaaqib ahaan, dhibanayaasha waxaa qasab ku ah inay go'aanshaan haddii qarashka ku baxaaya dacwada uu ka badan yahay faa'iidadada.

#### U gudbinta lacag bixinta Waaxda Dakhliga Minnesota si ay usoo uruuriso

Eedaysanaayasha lagu amray inay baxshaan lacagta magdhawga ah ayaa ama dhiibi kara lacagta oo dhan ama samaysan kara qorshaha lacag bixinta. Haddii aysan haysan cadadka buuxa ayna ku fashilmaan inay baxshaan lacagta la mudeeyay, amarka lacag bixinta ayaa loo gudbin karaa Waaxda Dakhliga Minnesota (MDR) si ay usoo qaado lacagta. Amarada lacag bixinta ay baxshaan dadka eedaysanayaasha ah ee ku jira xabsiga looma diraayo MDR.

Marka MDR ay hesho amarka magdhawga, waxay u diraysaa dalabka qarashka eedaysanaha, kaasoo ay ku jiraan qarashaadka aruurinta lacagta oo dhan 25 boqolkiiba cadadka laga rabo eedaysanaha. Qarashka ayaa lagu darayaa wadarta guud ee lagu leeyahay eedaysanaha mana yaraynayso cadadka magdhawga uu leeyahay dhibanuhu.

Eedaysanaha ayaa la xariiri kara MDR si ay u habayso lacag bixinta. Haddii aan sidaani dhicin, MDR ayaa adeegsan karta farsamooyin sida 'la wareegida dakhliga' si ay lacagta usoo qaado. Marka hanaankaan la adeegsado, lacagta ayaa laga jari karaa lacagaha gobalka iyo kuwa maxaliga ah ee uu leeyahay eedaysanuhu, sida lacag celinta canshuurta iyo guriga, magdhawiyada daynlaha, lacagaha tabarugaada siyaasada, lacagaha lagu helo bakhtiyaa nasiibka ee ka badan \$1,000, lacagaha adeeg bixiyaha/qandaraaslaha. Waxaa

## COLLECTING COURT-ORDERED RESTITUTION – SOMALI

intaas dheer, MDR ayaa lacag ka jaran karta koontada baanka, mushaaraadka, ama dakhliga kale; ka laabanaysa ganacsi iyo ruqsad ama ogolaansho xirfadeed; ama la wareegaysa hantida eedaysanaha ee ganacsigiisa ama gurigiisa.

MDR ayaa sidoo kale gudbin karta lacag qabsasho (xayirid) la saaro guri uu leeyahay eedaysanaha, kaasoo noqonaaya qaab ay MDR kula wareegayso guri gaar ah ama ganacsi ayna uga joojinayso eedaysanaha inuu iibiyo, wareejiyo, ama dib u maal geliyo. Waxaa intaas dheer, gudbinta la wareegis hanti ayaa u sahlaya MDR inay ka qaado lacag celinta ee lagu leeyahay ilaa heerka kiiska danbiga ah.

Lacagaha uu eedaysanuhu u diro MDR ayaa si qiyaasan loo waafajinayaa lacag celinta uusan bixin iyo qarashaadka soo aruurinta lacagaha aan la bixin. Haddii ay lacag canshuur ah MDR ku leedahay eedaysanaha, lacagtaas ayaa aadaysa daynta canshuurta kahor intaan la bixin lacag celinta. MDR ayaa lacag celinta la soo aruurshay u diraysa degmada amarka lacag bixinta lagusoo saaray, kadibna maamulka maxkamada ayaa maamulaaya una diraaya jeega dhibanaha.

MDR ayaa amarka lacag bixinta ku celin karta degmada haddii ay go'aanshaan in qaababkooda dayn aruurintu keeni doonin inay wax lacag ah ka qaadaan eedaysanaha.

### Su'aalaha Guud ee Ku saabsan Dib-u-dib Lacagta

#### Eedaysanuhu lacag bixinta miyuu toos ugu diraa dhibanaha?

Maya. Lacag bixinta waxaa loo diraa maamulka maxkamada. Maamulka maxkamada ayaa intaas kadib ka shaqaynaaya lacagta kadibna jeeg ugu diraaya boostada dhibanaha, taasoo qaadan karta dhawr asbuuc.

#### Sidee ayaan ku ogaanayaa qofka kormeeraaya eedaysanaha lagu hayo muraaqabada ama siidaynta la dabagalaayo la siiyay?

La xariir waaxda dabagalka eedaysanaha ee degmada ama xafiiska dhaqan celinta bulshada ee eedaysanayaasha dabagalka lagu hayo. Xafiiska dacwad oogaha ee maareeyay kiiska ayaa kuu gudbin kara xafiiska saxda ah. Waaxda Minnesota u qaabilsan Adeegyada Dhaqan Celinta Dhibanaha iyo Barnaamijka Soo Celinta Cadaalada (800-657-3830) ayaa ku siin kara xogta sarkaalka dabagalka ee eedaysanaayasha laga siidaayay xabsiga iyo kuwa ku jira fasaxa la kormeeraayo.

#### Amarka lacag bixinta ma la badali karaa si loogu daro khasaarooyin dheeraad ah oo lama filaan ah?

Maxkamada ayaa badali karta ama soo saari karta amarka lacag bixinta kadib marka xukunka dhaco ama booska badasho haddii (1) eedaysanuhu uu wali gacanta ugu jiro maxkamada, (2) dhibanuhu uu soo diray cadayn ku filan xaq lacagta magdhawga ah, iyo (3) qiimaha saxda ah ee khasaarooyinka dhibanaha aan la aqoon waqtiga xukunka ama xabsi dhista la samaynaayay. Hase yeeshee, sida dhabta ah, waa wax adag in la badalo amar, marka dhibanayaasha waxaa lagu boorinayaa inay aqoonsadaan khasaarooyinkooda ayna soo gudbiyaan cadayntooda kahor intaan xukunka ama amarku soo bixin.

#### Lacag dulsaar ah miyaa fuulaysa daynta lacag bixinta?

Lacag dulsaar ah ma fuulayso lacag bixinta lagu xukumay kiiska danbiga. Hase yeeshee, haddii amarka lacagta magdhawga ah lagusoo saaray xukun madani ah, lacag dulsaar ah ayay saarayaan maamulka maxkamada baaqiga lacagta aan la bixin ee xukunka madaniga ah ku jirtay waxaana lagu darayaa lacagta qofka laga rabo.

#### Sidee ayaan ku ogaanayaa sida amar loogu badalo xukun madani ah?

Xogta iyo foomamka la xariira badalida amar loo badalo xukun madani ah iyo sidoo kale soo aruurinta daynta ayaa laga heli karaa maamulka maxkamada ama webseedka Waaxda Garsoorka Minnesoo oo ah [www.mncourts.gov](http://www.mncourts.gov).

## Xog ku saabsan Dib-u-bixinta lacagta

Lacag bixinta waa lacag uu garsoore amro in eedaysane carruur ah ama qof wayn ah uu siiyo dhibane ayadoo qayb ka ah ganaaxa ama xukunka danbiga si loosoo mago khasaarooyinka qofka gaaray. Waxaa lagu saleeyaa khasaarooyinka ku dhaca dhibanaha ee ka dhasha danbiga ama awooda eedaysanaha ee bixinta lacagta.

Tusaalayaasha khasaarooyinka la xariira danbiga waxaa kamid noqon kara qarashaadka tacsida; caafimaadka, ilkaha, ama qarashaadka baxnaaninta; mushaaraadka lumay; khasaarooyinka hantida; iyo qarashka dayactirka hantida waxyeeladu ku dhacday.

Inkastoo lacag bixinta uu qayb ka noqon karo ganaax ama xukun ay maxkamad riday, dhibaneyaasha looma damaanad qaadi karo inay lacagta helayaan.

Soo aruurinta lacag bixinta ayaa dhibaato ku noqon karta dhibaneyaasha iskudayaaya inay kasoo kabtaan dareen ahaan, jir ahaan, iyo dhaqaale ahaan dhibaataada ka dhalatay danbiga. Waraaqdaan xogtu waxay sharaxaad ka bixinaysaa hanaanka uruurinta lacag bixinta.

---

### **Xafiiska Barnaamijka Caddaaladda Waaxda Ammaanka Guud ee Minnesota**

Office of Justice Programs  
Minnesota Department of Public Safety

445 Minnesota Street, Suite 2300  
St. Paul, MN 55101-1515

limayl: [dps.justiceprograms@state.mn.us](mailto:dps.justiceprograms@state.mn.us)  
Shabakadda internetka: [ojp.dps.mn.gov](http://ojp.dps.mn.gov)

651-201-7300 Telefoonka Guud  
888-622-8799 Telefoonka Lacagla'aanta  
651-296-5787 Fakis